IIB MA GALO

الجريدة الرسمية

# FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad | Muqdisho, 15 Abriile 1978 L. 1 R4/Bis

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA | جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 17/Bis ee 16 Maarso 1978, Dhisidda Wakaaladda soo Bixinta iyo Dhoofinta Alaabta iyo Alaabta Sahayda Maraakiibta.

### QAYBTA LABAAD

**XEER**

**W. M.**

### QAYBTA SEDDEXAAD

**TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH**

W. M.

SHARCI L. 17/BIS ee 16 Maarso 1978 ,Dhisid Wakaaladda soo Bixinta iyoDhoofinta Alaabta Tirada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta.-

MADAXWEYNAHA

**JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA**

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tii 3aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkeedu yahay 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1.7.1976 ;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 22 ee soo baxay 23.2. 1975;

ISAGOO TIXGELINAYA: Baahida dhaqaale ee haysa Ururka dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed oo dhawaan la aasaasay loona baahday in loo abuuro ila dhaqaale ayaa la guddoonsaday in la dhiso Wakaalad cusub oo ay hawsheedu tahay soo bixinta iyo dhoofinta alaabta, tirada alaabta iyo sahayda Maraakiibta;

ISAGOO TIXGEILNAYA: Go'aankii Golaha Dhexe ee XHKS.

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda:

## QAYBTA I

## HABKA DHISMAHA GUU D

### QODOBKA 1aad

### Dhismaha Wakaaladda

1. Waxaa la dhisayaa Wakaaladda soo bixinta iyo dhoofinta alaabta, tirad alaabta iyo sahayda Maraakiibta, waxaana hadda ka dib lagu magacaabi doonaa «WAKAALADDA».

2. Wakaaladdu waxay tahay mid madax bannaan, waxayna yeelanaysaa jiritaan iyo shakhsiyad sharciyeed.

3. Wakaaladdu waxay hoos imaan doontaa Ururka dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

4. Wakaaladdu waa inay u hogaansanaataa Sharciyada, Xeerarka iyo Barnaamijka X.H.K.S. xagga maamulka iyo asluubta shaqaalaha.

### Qodobka 2aad

### Xarunta iyo laamaha Wakaaladda

Xarunta dhexe ee Wakaaladda waxay ahaan doontaa Magaala Madaxda Xamar waxayna ku yeelan kartaa Gobollada iyo Degmooyinka Laamo ama Xafiisyo markii loobaahdo.

## QODOBKA 3aad

## UJEEDDOYINKA

Ujeeddada loo aasaasay Wakaaladdu waxay tahay iyadoo Xisbiga H.K.S. uu tixgelinayo inay tahay lagama maarmaan in la xoojiyo Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed si kor loogu qaado wax soo saarka, isku filnaashaha ay gaaraan.

## Qodobka 4aad

## Hawlaha loo xilsaaray Wakaaladda

Wakaaladda waxaa loo xilsaaray hawlaha soo socda:

1. Iney u iibiso Maraakiibta wax allaale wixii ay u baahan yihiin oo ay ka mid yihiin cuntada, batroolka, biyaha iyo wixii la mid ah.
2. Iney diyaariso wax allaale wixii ku saabsan habka iyo xaashiyaha alaabta looga soo bixinayo ama looga dhoofinayo Gegida dayuuradaha ee Dalka J.D.S.
3. Iney soo bixiso alaabta ka soo degta dekedaha ama gigida dayuuradaha ama ay ka dhoofiso cid kastaa ha lahaatee.
4. Iney tiriso alaabta ka soo degta dekadaha iyo Gegiyada dayuuradaha ama laga dhoofiyo Dalka.
5. Hawlaha lagu soo sheegay qodobkaan waxaa ka reeban iney qabtaan cid kale oo aan ahayn Wakaaladdan loo xilsaaray.

## Qodobka 5aad

## Awooda Wakaaladda

Wakaaladdu waxay awood buuxda u leedahay iney fuliso hawlaha loo xilsaaray ee lagu tilmaamay Qodobka 4aad ee Sharcigan.

## Qodobka 6aad

## Kormeerka iyo ilaalinta guud

Kormeerka iyo ilaalinta guud ee Wakaaladda waxaa yeelanaya Dawladda ee ku shaqo leh.

# QAYBTA II

## Maamulka Guud

## Qod. 7aad

## Maareeyaha Guud

1. Wakaaladdu waxaa madax u noqon doona Maareeye Guud oo lagu magacaabi doonaa Dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha J.D.S.

## Qodobka 8aad

### Hawlaha Maareeyaha Guud

ISagoo u hoggaansamaya Sharciyada iyo Xeerarka u degsan Dalka iyo Barnaamijka X.H.K.S. Maareeyaha Guud waxaa loo xilsaarayaa inuu wakiil ka noqdo Wakaaladda fuliyanahawlaha ku xusan qod. 4aad ee Sharcigaan wuxuu awood buuxda u leeyahay:

b — in uu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay markii uu ogglaasho ka helo Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed;

t — Mas'uul ka noqdo habka maamulka Wakaaladda, wuxuuna qaadan karaa go'aan xagga maamulka iyo shaqaalahaba isagoo raacaya sida ay dhigayaan sharciyada Dalka.

j — inuu mas'uul ka noqdo hantida Wakaaladda.

X — Inuu bixiyo wixii amarro ah oo lagama maarmaan u ah socodsiinta hawlaha Wakaaladda.

kh — Inuu si hagar la'aan ah ula shaqeeyo Uniga XHKS iyo Gudiga shaqaalaha ee ka dhisan Wakaaladda.

d — Mas'uul ka noqdo kor u qaadidda xirfadaha iyo Waxbarashada Shaqaalaha.

## Qodobka 9aad

### Magacaabidda Agaasimayaasha

Wakaaladdu waxay lahaan doontaa Agaasimayaal Waaxyo oo lagu magacaabi doono Dekreeto uu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

## Qodbka 10aad

### Hantida Wakaaladda

1. Wixii lacag ah ee ka soo gala hawsha ay qabato Wakaaladda

2. Wixii lacag keyd ah ee sannad kasta u dhiganta Wakaaladda (fondo riservato).

3. Wixii deeq ah ee ay ka hesho meel kasta.

## Qodobka 11aad

### Miisaaniyadda Wakaaladda

1. Mareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka

muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, wuxuuna hordhigi doonaa Guddiga Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed si ay u oggolaadaan.

2. Miisaaniyadda lacagta sannadka ee Wakaaladda waa inay ahaataa mid la socota tixgelineysana Qorshaha guud ee Qaranka.

## Qodobka 12aad

### Xiritaanka sannadka maaliyadda

Mareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horeeysa sannadkaas waa inuu isku dubaridda Miisaaniyadda Xiritaanka ee sannadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajinaya xisaabtii sannadka iyo bandhigii Macaashka Wakaaladda, taasoo uu u gudbinayo Guddiga dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

## Qodobka 13aad

### Amaah

Wakaaladdu iyadoo haysata oggolaanshaha Guddiga Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed waxay Bankiyada ka amaahan kartaa lacag haddii ay u baahato.

## Qodobka 14aad

### KHIDMADDA WAKAALADDA

Wakaaladdu waxay ka qaadaneysaa khidmad hawleed cid allaale cidii ay u qabato hawlaha ku tilmaaman qodobka 4aad ee Sharciga iyadoo raacaysa qiimaha uu dhigayo lifaaqa la socda sharcigan.

## Qodobka 15aad

### Ka reebid ganacsi gaar ahaaneed

Sida uu dhigayo qodobka 17aad ee Xeerka Shaqaalaha Wakaaladaha Dawladda, Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda ma geli karaan ganacsi, dullaal ama farsamo lid ku ah danaha iyo ujeeddooyinka loo aasaasay Wakaaladda.

## QAYBTA III

### Qodobbo Ugu dambeys ah

### Qodobka 16aad

### XEER NIDAAMIYE

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed wuxuu awood u leeyahay, isagoo tixeglinaaya talada Guddoomiyaha Hoggaanka Iskaashatooyinka ee Golaha Dhexe X.H.K.S.

inuu soo saaro Xeer Nidaamiye Dawladeed ee lagu fulinayo Sharcigan.

### Qodobka 17aad

### Tirtirid

Waxaa la tirtirayaa qodobka 3aad xubintiisa 2 (1) ee ku saabsan Iskaashatada sahaysiinta maraakiibta iyo qod 3aad xubintiisa 3aad ee sharciga lambarkiisu yahay 22 soona baxay 23.2.1975.

### Qodobèa 18aad

### Dhaqan gelid

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda wuxuuna dhaqan galayaa maalinta uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 16 Maarso 1978

Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya
Madaxwaynaha
Jaalle S/G Maxamed Siyaad Barre)

## LIFAAQA KU XUSAN QODOBKA 14aad EE SHARCIGAN

### QAYBTA SAHAYSIINTA MARAAKIIBTA

1. Khidmadda hawleed ee Sahaysiinta Maraakiibta waxaa laga qaadayaa sida soo socota:-

b. Shs. So. 100/— ilaa Shs. So. 10.000/= oo lagu kharash gareeyo cunto loo iibinaayo Maraakiibta, amase alaab kale oo loo gado waxaa laga qaadayaa korsaar (percentuale) ... Shs So. 10%

t. Shs. So. 10.000=/ wixii ka badan oo Maraakiibta wax loogu soo iibiyo waxaa laga qaadayaa korsaar (per centuale) Sh. 5%

2. Khidmadda laga qaadayo wixii batrool ah ee la siiyo Maraakiibta, fuustadiiba ama galaan waa.......Shs So. 2/=

3. Khidmadda laga qaadayo biyaha la siinaayo maraakiibta

1) halkii tan waa ...........Shs. So.35/=

### QAYBTA SOO BIXINTA ALAABTA

4. Khidmadda hawleed ee soo bixinta waxaa laga qaadayaa sida soo socota:-

b. 1 Kiilo ilaa 100 Kiintaal . . . . . . . . . . Shs. So. 300

t. 50 Kiintaal ilaa 100 Kiintaal . . . . 400/=

j. 100 Kiintaal ilaa 500 kiintaal . . . Shs. So. 800/=

x. 500 Kiintaal iyo wixii ka badan . Shs. So. 2/=Kiintaalkba

### QAYBTA DIRIDDA ALAABTA

5. Khidmadda hawleed ee dhoofinta alaabta waxaa laga qaadayaa sida soo sicota :-
b. 1 Kiilo ilaa 50 kiintaal . . . . Shs. So. 350/=
t. 50 Kiintaal ilaa 100 kiintaal . . . » 450/=
j. 100 Kiintaal ilaa 500 oo kiintaal . » 1.000/=
x. 500 Kiintaal iyo wixii ka badan . . » 2/ kiintaalkiiba.

### QAYBTA DIRIDDA ALAABTA SOO DEGTA IYO TAN LA DHOOFIYO

6. Khidmadda hawleed ee tirada alaabta soo degta iyo tan la dhoofinaayo waxa laga qaadayaa sida soo socota:

b. Halkii tan waa . . . . . . . . . . Shs. So. 2/=